

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 3aad

Muqdisho,

2015

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN SANADLE

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – RUKUNKA: Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA


2015



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN



MADAXWAYNAHA J. F. S.,

Markuu arkay: Qodobka 87aad, Xarafka 'C' ee Dastuurka KMG

Markuu arkay: Qodobka 90aad, Xarafka 'F' ee Dastuurka KMG

Markuu arkay: Qodobka 27aad ee Sharciga Lr. 04 ee soo baxay 02/04/2015 kuna saabsan Guddiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka.

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. 802/3/1/15 ee 21/07/2015 kuna saabsan Ansaxinta Golaha Shacabka ee Magacyada Guddiga madaxbanaan ee Doorashooyinka

1. M.ne Cabdiraxmaan Cusmaan Dirir
2. M.ne Maxamed Axmed Nuur
3. M.ne Maxamed Daahir Maxamuud
4. M.ne Maxamed Xasan Taani
5. M.ne Saciid Xaashi Warsame
6. M.ne Sayid Cali Sh. Maxamed
7. M.ne Xuseen Cabdi Aadan
8. Marwo Khadiijo Cosoble Cali
9. Marwo Xaliimo Ismaaciil Ibraahin

Markuu Tixgeliyay: Aqoonta iyo waayo-aragnimada dadka loo magacaabay Guddiga kor ku xusan.

Wuxuu soo saaray Xeerkaan


Qodobka 1aad

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed saxiixo Xeerkaan, Madaxweynuhu waxa uu oggolaaday magacaabidda iyo Ansaxinta Sharciga Guddiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka.

Qodobka 2a ad

Xeerkaan waxa uu dhaqangelayaa maalinta uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO 02/08/2015



Madaxweynaha J.F.S
Xasan Sheekh Maxamuud